

Muxuu yahay Maaraynta Kiiska Naafada Korriinku?

Lahaanshaha maaraynta kiiska degmadu waa furaha helitaanka barnaamijyada iyo adeegyada u gaar ah naafonimada. Maareeyayaasha kiiska waxa kale oo la yidhaa shaqaalaha bulshada.

Maareeyayaasha kiisku waxay bixiyaan ama qabanqaabiyaan:

- U-sheegista qofka iyo/ama wakiilkiisa sharciga ah ikhtiyaarada adeega ee jira.
- Gargaarista qeexida adeeg bixiyayaasha suurtagalka ah.
- Kobicinta qorshe adeeg oo ku salaysan xulka qofka iyo baahidiisa.
- Gargaarista helitaanka adeegyada loo baahan yahay.
- Bixinta isku-duwista adeega.
- Ka-warhaynta iyo qiimaynta adeegyada lagu qeexay qorshaha adeega.

Ayaa u qalma Maaraynta Kiiska Naafada Korriinka?

- Qofku waa inuu naafo ka yahay korriinka (xayirnaan aad ah xagga shaqada garashada oo la socoto dhinaan dhaqanka la-qabsashada oo jira kahor taariikhda dhalashada ee 22^{ad}) ama xaalad la xiriirta.
- Si aad ugu qalanto xaalada la xiriirta, qofku waa inuu qabaa naafonimo keentay dhinaanshaha shaqada garashada guud ama dhaqanka la-qabsashada oo la mid ah ta dadka qaba naafonimada garashada.

Sidee buu u shaqeeyaa habka codsigu?

Degmadu waxa looga baahan yahay inay qabanqaabiso qiimayn idil oo baaritaan 35 maalmood gudahood marka ay helaan codsiga maaraynta kiiska adeegyada. Qiimayntaas baaritaanka ah waa in ay muujiso inuu qofku qaba naafonimada korriinka ama xaalad la xiriirta. Macluumaadka baaritaanka ee dugsiyada iyo bixiyayaasha kale waxa loo adeegsan karaa rabitaanada qiimaynta baaritaanka kol haddii baaritaanka danbe ay ku jiraan dhammaan macluumaadkii loo baahnaa.

Qiimaynta waa inay ku jiraan (per Minnesota Rule 9525.0016 Subp. 3):

- Imtixaan sugan ee shaqaynta garashada iyo qiimayn xirfadaha la-qabsiga, ama qiimayno sugan ee korriinka shaqanaya ee ilmaha ka yar 5 sanno jirka
- Warbixinta taariikh bulshanimoo oo aan ka weynayn 12 bilood oo ay ku jiraan:
 - Qofka korriinkiisa iyo taariikhda bulshanimoo oo ay ku jiraan macluumaadka taageerada
 - Qodobada bulshanimoo, maskax ahaan iyo cimilo ahaan ee saamayn ku yeelan kara heerka waxqabad ee qofka.
 - Macluumaad kasta oo taageraya ama burinaya naafonimada korriin ee qofka kahor da'da 22.
- Qiimayn caafimaad oo ka socota takhtar sharciga aan ka weynayn 12 bilood oo ay ku jirto qiimaynta caafimaadka guud, araga, maqalka, xaalado jidh ama dareen aan caadi ahayn, iyo hadalka takhtarka ee caafimaadka, iyo niyad wanaaga qofka, haddii la og yahay.

Maxaa dhacaya markaan codsado?

- Ka sug go'aan qoraal ah degmada.
- Haddii qofku u-qalmo, waxa bilaaban doona maareeynta kiis naafonimo korriin.
- Haddii degmadu garato in aanu qofku u qalmin, wad ka racfaani kartaa go'aanka degmada. La xidhiidh Arc ama wakaalad kale si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah habka racfaanka.

Wixii macluumaad dheeraad ama adeegyo u-doodid ah, kala xiriir Arc Greater Twin Cities 952-920-0855 ama booqo www.arcgreatertwincities.org.

Dhokomentigani ma aha talo sharci ah, in sidaas loo dhigana ma aha. Taas darteed, macluumaad halkan ku qorani ma beddeli karaan talada garyaqaan. Xarunta Sharciga Naafada Minnesota waxa lagala xiriir karaa (612) 334-5970.